CESDM
CENTER FOR EXCELLENCE IN SUPPORTED DECISION MAKING

Volunteers of America®
MINNESOTA AND WISCONSIN

# Joojinta ama Wax ka Beddelidda Mas'uuliyada Hanti ee ay Maxkamaddu Magacowdo

## Su'aalaha Badanaa La Iswaydiiyo

Mas'uuliyada hanti ee ay Maxkamaddu Magacowdo waa la dhamayn karaa (waa la joojin karaa) ama wax ayaa laga beddeli karaa (waa la beddeli karaa). Mas'uuliyada hanti ee ay maxkamaddu qofka u magacowdo ayaa laga yaabaa in loo sameeyey qof qaba naafo garasho, qof ka xanuunsan dhimirka, ama naafanimada garaadka, sababtoo ah waxaa jiray walaac laga qabo badqabka qofka ama in uusan awoodi doonin inay ilaashadaan oo ay maareeyaan arrimahooda maaliyadeed. **Maadaama markii hore loo baahnaa Mas'uuliyada Hanti ee ay maxkamaddu magacowdo macnaheedu maaha in weli loo baahan yahay. Waxaa wanaagsan in dib loo qiimeeyo in nidaamkan sharciyeed uu weli loo baahan yahay ama in wax laga beddelo qaabka uu hadda u jiro.**

## Muddo intee le'eg ayay sii jirtaa mas'uuliyada hanti ee ay maxkamaddu magacowdo?

Haddii uusan garsoore xaddidin muddada ballanta, mas'uuliyada hanti ee ay maxkamaddu magacowdo waxay sii jiri doontaa ilaa:

- Qofka ka dhimanayo.
- Maxkamaddu **ka soo gunaanadayso ama wax ka beddelayso** qabanqaabada lagu sameeyay codsi iyo dhageysi maxkamadeed oo caddeynaya in mas'uuliyada hanti ee ay maxkamaddu magacowda aanay mar dambe loo baahnayn.

**Ma la beddeli karaa mise ma la soo gunaanadi karaa?**

**Haa,** xitaa haddii naafanimada qofka aysan soo fiicnaanin, weli waa suurtogal in la raadiyo gunaanadka mas'uuliyada hanti ee ay maxkamaddu magacowda gebi ahaanba, ama qofka dib loogu soo celiyo qaar ka mid ah xuquuqdiisa maaliyadeed, iyadoo ay sii jirayso heerarka ilaalinta qaarkood iyada oo wax Wax ka beddel awoodaha mas'uuliyada hanti ee ay maxkamaddu magacowdo.

**Maxaa isbeddel loo tixgalinayaa?**

- Qofku waxaa laga yaabaa inuu aad ugu furan yahay inuu helo caawimo dheeraad ah oo ku saabsan go'aan qaadashada ama maaraynta dhaqaalihiisa marka loo eego markii ay mas'uulka maxkamaddu u magacowday.
- Nidaamyo taageero ama adeegyo cusub ayaa la heli karaa ama hadda way habboon yihiin.
- Waxaa hadda wax badan ka ognahay taageerada la heli karo si loo hubiyo in qofku baahiyihiisa la daboolo isagoo dhawraya xuquuqihiisa go'aan qaadashada.

## Waa maxay su'aalaha ay tahay in la isweydiiyo kahor intaanan la samaynin joojinta ama isbeddellada?

- Qofku ma haystaa kooxo hadda siiso taageero? Ma la aqoonsan karaa kadibna ma horumarin karaa?
- Qofka ma rabaa inuu aqbalo caawimaada?
- Ka fikir dhammaan waxyaabaha uu hadda mas'uulnimada ay maxkamaddu magacowday u qabanayo qofka: Haddii uusan mar dambe ahaan lahayn mas'uulka ay maxkamaddu magacowday, ma diyaar buu u ahaan lahaa inuu qofka ka sii caawiyo arrimahaas? Tani waxay noqon kartaa adeegyada bangiga ama in loo magacaabo wakiil sharci oo ku shaqeeya awood qareen isagoo qofka matalaya. Ma qof kale ayaa diyaar u noqon lahaa?
- Ma jiraan qalab ama habab kale oo waxtar leh oona u baahnayn mas'uul ay maxkamada magacowday?
- Dhaqaalaha ma lagu ilaalin karaa heshiisyo ka baxsan mas'uuliyada hanti ee ay maxkamaddu magacowdo?

## Goorma ayay tahay waqti fiican in dib loo eego in mas'uuliyada hanti ee ay maxkamaddu magacowdo ay weli lagama maarmaan tahay iyo in kale?

- Marka la dhammeeyo dukumentiyada warbixinta sanadlaha ah ee maxkamadda.
- Haddii uu isbeddel ku imaado in qofka uu wali rabo inuu aqbalo in la siiyo caawimaad ama haddii qofku uusan haysan lacag ama guri u baahan in la maareeyo.
- Taageero iyo adeegyo aan horey u sii jirin ayaa hadda la heli karaa.
- Haddii qofku codsado joojinta ama beddelidda mas'uuliyada hanti ee ay maxkamaddu magacowdo.

# Joojinta ama Wax ka Beddelidda Mas'uuliyada Hanti ee ay Maxkamaddu Magacowdo

SU'AALAHA BADANAA LA ISWEYDIIYO

## Naafanimada qofka ama xaaladda caafimaad isma beddelin — miyaanay weli qofka u baahnayn qof masuul ah oo ay maxkamada u magacowdo?

**Daruuri maahan.** Baahida loo qabo qof ay maxkamada u magacowdo mas'uuliyada hanti waxay ku saleysan tahay **in qofku uusan dabooli karo baahiyihiisa dhaqaale isagoo adeegsanaya fursado kale**, ee maaha naafonimadiisa, in cudur lagu arkay, ama heerkiisa shaqa qabashada. Markii ugu horreysay ee la codsaday mas'uuliyada hanti ee ay maxkamaddu magacowdo, maxkamaddu waxay u badan tahay inay u baahnayd caddayn muujinaysa:

- In qaabab kale oo taageero lagu helayo la isku dayay,
- Muddada la tijaabiyay, iyo
- Sababta ay u shaqayn waayeen.

Haddii ay jiraan siyaabo fudud oo lagu dabooli karo baahiyaha qofka oo qofku ku raacsan yahay, ama haddii ay yar tahay hantida ay tahay in la maamulo, waxaa laga yaabaa in aan loo baahnayn mas'uuliyada hanti ee ay maxkamaddu magacowdo.

## Maxay yihiin qaar ka mid ah arrimaha muhiimka ah ee muujinaya inaan ka fikirno joojinta ama wax ka beddelka?

Isbeddellada dhawaan lagu sameeyay Go'aan qaadashada qofka laga taageeray waxay aqoonsanayaan in dadku aysan had iyo jeer u baahnayn Qof ay maxkamada u magacowdo inuu u dhawro hantidooda. Ka fiirso wixii isbeddel ah ee dhacay tan iyo markii la aasaasay qofka ay maxkamadda magacowdo inuu ilaaliyo hantida si loo go'aamiyo in weli loo baahan yahay si loo daboolo baahiyaha qofka:

- Qofku wuxuu helay ama dib u helay xirfado badan.
- Tiknoolajiyada cusub ayaa hadda diyaar ah oo qofka ka caawin doonta, sida digniinaha taleefanka si loogu xasuusiyo inay bixiyaan biilasha.
- Hawlaha bangiyada sida lacag dhigida tooska ah iyo u bixinta biila otomaatiga ah ayaa la heli karaa.
- Qabanqaabada maamulka maaliyadeed hadda waa la heli karaa, sida Representative Payee, Daily Money Managers, ama in laga caawiyo hagaajinta biilasha iyo waraaqaha.
- Rabitaan cusub oo lagu aqbalayo caawimaad laga helo qoyska, asxaabta, ama bulshada.
- Qofku ma haysto hanti u baahan in uu maamulo qof ay maxkamada u magacowdo.
- Falal khiyaamo ama dhicis oo horey loo geystay inaysan ahayn khatar hadda jirta.
- In la heli karo taageero iyo adeegyo aan horey u jirin, sida Representative Payee.

Sidoo kale tixgeli nidaamyada kale ee taageerada ee wax ka qaban kara baahiyahooda haddii ay dhammaato la joojiyo qofka ay maxkamadu u magacowdo inuu masuul uga noqdo hantida:

- Ku isticmaalida bankiga qaab onlayn ah: qof caawinaya oo la aamini karo ayaa la socon kara dhaqdhaqaaqooda bangiyada si loo hubiyo inaysan jirin wax walaac ah oo ku saabsan kharash gareyn xad dhaaf ah ama ku guuldareysiga bixinta biilasha.
- Representative Payee.
- Qof aad si sharci ah u doortay inuu kuu matalo, ama inuu kaa caawiyo qof aad ku kalsoon tahay hawlaha bangiyada.
- Taageerada qoyska, asxaabta, ama bulshada.

**Fikir:** *Waa maxay nidaamyada taageerada ee beddeli kara mas'uuliyada Hanti ee ay maxkamaddu Magacowdo? Taageerooyinkan ayaa laga yaabaa inay horey u jireen, taasoo ka dhigaysa mas'uuliyada hanti ee ay maxkamaddu magacowdo mid aan loo baahnayn.*

# Joojinta ama Wax ka Beddelidda Mas'uuliyada Hanti ee ay Maxkamaddu Magacowdo

SU'AALAHA BADANAA LA ISWEYDIIYO

## Ma u baahanahay dukumentiyo ama taageero laga helo dhakhtar ama qof kale oo bixiya daryeel caafimaad?

Maya. Qiimayn caafimaad ama cilmi-nafsiyeed oo lagu xaqiijinayo in qofku uu ka soo fiicnaanayo ama ka soo kabtay xaalad dhimir, garaad, ama waali looma baahna. Waxaad u baahan tahay oo keliya inaad caddeyso:

- In qofka uusan u baahnayn heerka ilaalinta ee ay bixiso mas'uuliyada Hanti ee ay maxkamaddu Magacowdo, iyo
- In baahidooda aan lagu dabooli karin taageero kale.

Sharciga Minnesota uma baahna dukumentiyo gaar ah, marka laga reebo Codsi lagu Joojinayo (ama wax looga beddelayo) Mas'uuliyada Hanti ee ay Maxkamaddu Magacowdo iyo foomamka kale ee maxkamadda ee la xiriira hanaanka maxkamadda (oo ay ku jirto Xisaabinta Kama Dambeysta ah). Taageero dheeraad ah ayaa laga yaabaa in loo baahdo si loogu wargeliyo dadka kale waxa sharcigu u baahan yahay. Mararka qaarkood, garsoorayaashu waxay ku adkeysan doonaan inay u baahan yihiin dukumentiyo, kiiskan, hadallo taageero ah oo laga helo xirfadlayaal ayaa waxtar yeelan doona.

## Sideen ugu diyaar garoobnaa dhageysiga maxkamadda?

Isu diyaari inaad maxkamadda u sheegto:

- Waxa isbeddelay tan iyo markii la bilaabay mas'uuliyada hanti ee ay maxkamaddu magacowdo.
- Tallaabooyinka iyo hababka sharciyeed ee lala eegay qofka, iyo habka sharciyeed ee uu isticmaali doono haddii mas'uuliyada hanti ee ay maxkamaddu magacowdo la joojiyo (tusaale ahaan, wakiilnimo sharciyeed oo lagu maareeyo laguna ilaaliyo hantidiisa iyo arrimihiisa maaliyadeed).
- Sida qofka u heli doono daryeelka iyo adeegyada.
- Sida ay u adeegsan doonaan go'aan-qaadasho la taageeray iyo habab kale marka ay u baahan yihiin caawimo dheeraad ah si ay u fahmaan xaaladdooda ugana gaaraan go'aanno aysan kaligood qaadan karin.

Qoraal ama caddeyn ay bixiyeen shaqaale bulsho, dhakhtar, ama xirfadle kale oo caafimaad oo taageeraya in mas'uulnimada sharciyeed la joojiyo ama wax laga beddelo khasab ma aha. Si kastaba ha ahaatee, wuxuu xoojin karaa kiiskaaga.

## Sideen u diyaar garownaa? Nolosha qofka miyaanay jahawareer gelayn haddii uu si lama filaan ah u waayo qofkii sharci ahaan u maamulayay hantidiisa?

Joojinta maamulida hantida ee sharciga ah kama dhigna in la joojinayo taageerada. Waxay la macno tahay in qofku uu heli doono taageerada uu rabo oo uu u baahan yahay si uu uga caawiyo maaraynta iyo ilaalinta dhaqaalihiisa, halkii ay maxkamada u doori lahayd qof u ilaaliyo. Iyadoo lagu salaynayo baahiyaha qofka, waxa uu doorbidayo, iyo awooddiisa sharci ee uu heshiisyo ku geli karo, qofku wuxuu dooran karaa inuu:

- Saxiixo oggolaanshaha bixinta macluumaadka, si dadka bixiya adeegyada kala duwan loogu oggolaado inay la hadlaan qof kale oo loo idmaday arrimaha la xiriira bixinta biilasha.
- Qoraal ku caddeeyo nidaamyada taageerada isaga oo buuxinaya Heshiiska Go'aan-qaadashada Laga Caawiyo.
- Inuu sameeyo habab bangiyeed oo waxtar leh, sida in biilasha si toos ah looga bixiyo akoonkiisa iyo in dakhligiisa si toos ah loogu shubo akoonkiisa bangiga.
- Qof u magacaabo inuu u maamulo arrimihiisa maaliyadeed isagoo siinaya Wakiilnimo Sharci (qofka la magacaabo waxaa loo yaqaan wakiil sharci oo la magacaabay, hase yeeshee khasab ma aha inuu noqdo qareen) ama kale oo uu dooran karaa habab kale oo la mid ah.
- Haddii uu leeyahay wakiil loo magacaabay inuu maamulo lacagaha macaashka ee uu ka helo Caymiska Sooshiyaal Sekiyuuritiga, xiriirkaas wuu sii soconayaa xitaa haddii maamulka hantida ee maxkamada magacowday la joojiyo, maadaama magacaabista wakiilkaas ay samaysay Maamulka Sooshiyaal Sekiyuuritiga.

Waxa ugu muhiimsan, **qofku waa inuu si firfircoon uga qaybqaataa wadahadallada qorsheynta.**

# Joojinta ama Wax ka Beddelidda Mas'uuliyada Hanti ee ay Maxkamaddu Magacowdo

SU'AALAHA BADANAA LA ISWEYDIIYO

## Ka warran haddii qofka ay maxkamada u magacowday masuuliyada hantida ama dad kale ay aaminsan yihiin in maamulka hantida ee maxkamadu magacawdo wali lagama maarmaan tahay?

Waa wax caadi ah in dadku ay walwalaan ama aysan hubin marka ay ka hadlayaan isbeddel weyn sida joojinta maamulka hantida ee maxkamadu magacowdo. Waxaa laga yaabaa inay ku caawiso inaad u sharaxdo qofka walaacsan:

- In qofka ku jira maamulka hantida ay maxkamadu magacawdo uu qirayo inuu weli u baahan yahay oo uu doonayo caawimo la mid ah tii uu hore u siin jiray maamulaha hantida ee ay maxkamadu magacawday.
- Taageerooyinka uu qofku heli doono haddii maamulka hantida ee maxkamadu ay magacawday la soo afjaro.

Ugu dambayn, maxkamadda ayaa gaadha go'aanka kama dambaysta ah ee ku saabsan in la joojiyo iyo in aan la joojin maamulka hantida ee maxkamada ay magacawdo. Sidaa darteed, qofka iyo dadka taageera waxay sii wadi karaan codsigooda xataa haddii ay jiraan dad kale oo ka soo horjeeda. Codsiga iyo dhegeysiga maxkamaddaba, qofka ama taageerayaashiisu waa inay diyaar u yihiin inay sharxaan sababaha ay u codsanayaan in la joojiyo maamulka hantida ee ay maxkamadu magacawday, iyo sida qofku u heli doono taageero ama caawimo marka loo baahdo haddii maamulka hantida ee ay maxkamadu magacawday la joojiyo.

Haddii diidmada maamulaha hantida ee ay maxkamada magacawday ama dadka kale ay u badan tahay inay sababto in codsiga lagu joojinayo maamulka hantida ee maxkamadu magacawdo la diido, tixgeli xeelado hal-abuur leh:

- Tixgeli inaad codsat in la magacaabo maamule hanti oo beddelaya kan hadda jira, halkii aad ka codsan lahayd in la joojiyo maamulka hantida ee maxkamadu magacawdo. In la helo qof lagu kalsoon yahay oo loo magacaabo beddelka maamulaha hantida ee maxkamada magacawday waxay yareyn kartaa diidmada maamulaha hadda haya maamulka hantida iyo weliba dadka kale ee arrintan ka walaacsan. Qofka lagu beddelaya iyo qofka hadda shaqada haya ayaa markaa ka wada shaqayn kara joojinada mustaqbalka.
- Ku bilow inaad Maxkamadda ka codsato inay wax ka beddesho maamulka hantida halkii laga codsan lahaa in la soo afjaro, si loo muujiyo in qofku awood u leeyahay inuu maareeyo qaar ka mid ah mas'uuliyadihiisa isaga oo aan u baahnayn awoodda maamulaha ay Maxkamaddu u magacawday dhammaan arrimaha.
- Qofka, qof u maamula hantidiisa, iyo dadka kale ee taageera waxay ka wada shaqayn karaan horumarinta xirfadaha qofka iyagoo ilaalinaya nidaamka maamulka hantida ee maxkamadu magacawdo, maxkamaddana waxay ka codsan karaan in maamulkaas la joojiyo ama lagu beddelo ikhtiyaarro kale oo la heli karo hadhow danbe.

## Wixii Macluumaad Dheeraad ah

Wixii talo shaqsiyeed ah oo ku saabsan xaaladdaada, la xiriir:

Laynka Macluumaadka Mas'uulnimada Maxkamadeed:
**952-945-4174** ama **844-333-1748**
**cesdm@voamn.org**

Booqo websaydkeena wixii macluumaad dheeraad ah:

**www.voamnwi.org/cesdm ama iskaan mari QR koodhka**

*Diyaarinta dukumeentigan waxaa lagu taageeray maalgelin ay bixisay Waaxda Adeegyada Aadanaha ee Minnesota (MN), Qaybta Adeegyada Waayeelka iyo Dadka Naafada ah.*